Kusoo dhowoow

Washington Apple Health

Adeegaha Caafimaadka Hab Dhaqanka
Gobolada Clark iyo Skamania

Washington
Apple Health

Washington State Health Care Authority

If this is not in a language you can read, please call 1-800-562-3022 for help. (TTY/TDD only 1-800-848-5429).
ENGLISH

ይህ፣ እርስዎ በሚገባዎ ቋንቋ ካልተጻፈ፣ እርዳታ ለማግኘት ወደ 1-800-562-3022 ይደውሉ (ለ TTY/TDD ብቻ 1-800-848-5429).
AMHARIC

إن لم يكن هذا مكتوبًا بلغة يمكنك قراءتها، فالرجاء الاتصال بالرقم 1-800-562-3022 للحصول على المساعدة (بالنسبة لأجهزة الاتصال الخاصة بضعاف السمع/الهواتف النصية (TTY/TDD) فقط اتصل بالرقم 1-800-848-5429)
ARABIC

သင်ဖတ်နိုင်သည့်ဘာသာစကားဖြင့်မရှိလျှင် အကူအညီအတွက် ၁-၈၀၀-၅۶၂-၃၀၂၂ သို့ ကျေးဇူးပြုပြီး ခေါ်ဆိုပါ။ (TTY/TDD အတွက်သာလျှင် ၁-၈၀၀-၈၄۶-၅۶၂۶)
BURMESE

ប្រសិនវាមិនមែនជាភាសាដែលអ្នកអាចអានបាន សូមទូរស័ព្ទ 1-800-562-3022 សំរាប់ជំនួយ ។ (TTY/TDDសំរាប់តែមនុស្សត និងមនុស្សមានត្រចៀកធ្ងន់ប៉ុណ្ណោះ 1-800-848-5429) ។
CAMBODIAN

如果这不是你熟悉的语言，请拨打求助电话：1-800-562-3022（TTY/TDD专线：1-800-848-5429）。
CHINESE

해당 언어를 읽을 수 없다면 1-800-562-3022 (TTY/TDD의 경우, 1-800-848-5429) 에 전화를 걸어 도움을 요청하십시오.
KOREAN

ຖ້າອັນນี้ບໍ່ແມ່ນພາສາທີ່ທ່ານອ່ານໄດ້, ກະຣຸນາໂທຫາ 1-800-562-3022 ເພື່ອຂໍຄວາມຊ່ວຍເຫລືອ. (ສຳລັບ TTY/TDD ເທົ່ານັ້ນ 1-800-848-5429).
LAOTIAN

ਜੇ ਤੁਸੀਂ ਇਸ ਭਾਸ਼ਾ ਨੂੰ ਪੜ੍ਹ ਨਹੀਂ ਸਕਦੇ, ਤਾਂ ਮਦਦ ਲਈ ਕਿਰਪਾ ਕਰਕੇ 1-800-562-3022 'ਤੇ ਫ਼ੋਨ ਕਰੋ। (ਕੇਵਲ TTY/TDD ਲਈ 1-800-848-5429)।
PUNJABI

Если данный документ напечатан на языке, на котором вы не можете читать, пожалуйста, обратитесь за помощью, позвонив по телефону 1-800-562-3022. (Линия для пользователей TTY/TTD: 1-800-848-5429).
RUSSIAN

Haddii aysan tani ahayn luuqadda aad akhrin kartid, fadlan wac 1-800-562-3022 si laguu caawiyo. (TTY/TDD keliya 1-800-848-5429).
SOMALI

Si esto no está en un idioma que puede leer, por favor llame al 1-800-562-3022 para recibir ayuda (Solo usuarios TTY/TDD 1-800-848-5429).
SPANISH

Kung hindi ito nasa isang wika na inyong mababasa, mangyaring tumawag sa 1-800-562-3022 para matulungan. (TTY/TDD lamang 1-800-848-5429).
TAGALOG

እዚ። ከተንበብዎ ብእትኽእሉ ቋንቋ ተጻሒፉ እንተዘየሎ። ሓገዝ ንምርካብ ብኽብረትኩም ናብ 1-800-562-3022 ደውሉ፥ (ብ1-800-848-5429 ድማ ንቲ.ቲ.ዋይ/ቲ.ዲ.ዲ ጥራይ)፣
TIGRIGNA

Якщо ви не можете прочитати цю інформацію, будь ласка, зверніться по допомогу за телефоном 1-800-562-3022 (тільки для користувачів пристроїв TTY/TTD: 1-800-848-5429)
UKRAINIAN

Nếu đây không phải là ngôn ngữ của quý vị, xin hãy gọi số 1-800-562-3022 để được giúp đỡ. (Số 1-800-848-5429 dành cho người dùng TTY/TDD).
VIETNAMESE

Siddee loola xiriiraa Xarunta Macamiilka Apple Health

Siddee

Adiga waad hadli kartaa ama waxaad kudhufan kartaa lambarka kujira labbada qaansadood dhexdooda. Waad geli kartaa wakhti kasta.

1-800-562-3022

Kujir khadka ama

Ingiriisi ..... [1]
Isbaanish ..... [2]

Adeegaha Macmiilka ..... [6]

Afeef kusaabsan buugg yarahaan:

Buuggyarahan wuxuu kubari doonaa dheefahaaga caafimaadka hab dhaqanka (adeegaha daaweynta aalkoolada, daroogada iyo caafimaadka maskaxda) wuxuuna kuu sharxi doonaa xuquuqahaaga iyo waajibaadyadaada, sida lagu helo adeegaha, sida loo bedelo qorshooyinka caafimaadka hab dhaqanka. Fadlan lasoco buugg yarahaan masamaynayo wax xuquuqo sharci ah ama xaq u yeelasho ah. Waajib kuguma ahan in aad ugu tiirsanaatid buuggyarahan sida in uu yahay kaliya xogtaada macluumaadka kusaabsan Apple Health (Caawimaad caafimaadka). Waxaad kaheli kartaa macluumaad faah-faahsan oo kusaabsan Apple Health adiga oo ka eega ama gala bogga internetka Maamulka Daryeelka Caafimaadka ee kuqoran Bogga Sharciyada iyo Xeerarka, **www.hca.wa.gov/pages/rules_index.aspx** .

Washington State Health Care Authority

Lambarka Aqoonsiga Macaamilka (ID Number):
Magac:
Ciwaan:

Foomka Isqoritaanka (Enrollment Form)

***U Fudud Sida* 1-2-3!**

1. Fadlan Sax Hal Sandduuq Kaliya Si aad ku muujisid Ceymiska aad u doonayso Qoyskaada.

- ☐ Amerigroup Washington Inc. (AMG)
- ☐ Community Health Plan of Washington (CHPW)
- ☐ Coordinated Care of Washington (CCW)
- ☐ Molina Healthcare of Washington Inc. (MHW)
- ☐ United Health Care Community Plan (UHC)
- ☐ UJRADA ADEEGGA
- ☐ KILINIGA PCCM

2. Ku qor magaca dhaqtarka ama kiliniga aad u doonayso qof walba oo qoyskaada ah. Dhamaantiba dhaqaatiirta iyo kiliniga aad doonatay waa inay ku jiraan ceymiska aad doonatay. Fadlan marka hore wac dhaqtarka oo weydii inay qaataan ceymiska aad doonayso inaad doorato.

Aqoonsiga Macmiilka	Magaca Macmiilka (Dambe, Hore, MI)	Sidee ku qiimeyn lahayd caafimaadka ruuxaan? Aad iyo wacan	Aad u fican	Fican	Ma-fican	Xun	Ruuxaan ma leyahey ofisbeeto xoga caafimaadka ama kontiraka ah? Haa	Maya
		☐	☐	☐	☐	☐	☐	☐
Taktarka ama Kiliniga:								
		☐	☐	☐	☐	☐	☐	☐
Taktarka ama Kiliniga:								
		☐	☐	☐	☐	☐	☐	☐
Taktarka ama Kiliniga:								
		☐	☐	☐	☐	☐	☐	☐
Taktarka ama Kiliniga:								
		☐	☐	☐	☐	☐	☐	☐
Taktarka ama Kiliniga:								
		☐	☐	☐	☐	☐	☐	☐
Taktarka ama Kiliniga:								

3. Ma jiraa qof uur leh ama hada dhaqtarku qalayo?

☐ Uur leh — Aqoonsi Macmiil Xubin Qoys: _____ Maalinta la filayo inay dhashso: _____ Taktarka ama Kiliniga: _____

☐ Jahwaliso Maalinta Qaliisanka — Aqoonsi Macmiil Xubin Qoys: _____ Maalin: _____

Saxiixa_____ **Maalinta**_____

Dooro HAL hab oo aad noogu soo sheegto Ceymiska aad jeceshahay inaad doorato.

- Ka saxix Internet-kasna ah : https://www.WAProviderOne.org/client
- Soo wac Telefoonkeena automatikada ah: 1-800-562-3022
- Soo Buuxi, ku soo duub kuna soo dir baabada la socota, ipadod ay ka muuqato bansaarka cleeankka ay u soccoto (stamp-na uma baahna)
- Soo buuxi ka dibna fakis noogu soo dir: **1-866-668-1214**

Haddii aad qabto wax su'aal ah naga soo wac 1-800-562-3022,
Isniinta – Jimcaha 7:30 a.m. ilaa 5:00 p.m.
Dadka isticmaala Telefoonka TTY/TDD waxay naga soo wici karaan 711 ama 1-800-848-5429

Provider One Number

HCA 13-862 SM (1/16) Somali

http://www.hca.wa.gov/medicaid/forms/documents/13_862sm.pdf

Kusoo dhowoow Washington Apple Health

Adiga waxaad helaysaa buugg yarahaan sababtoo ah waxaad wakhti dhow isku qortey Washington Apple Health (caawimaada Caafimaadka). Maamulka Daryeelka Caafimaadka Gobolka Washington (HCA) ayaa maamula Apple Health oona qandaraas la gala qorshooyinka daryeelka maamulan si loo bixiyo ceynsanaanta adeegaha caafimaadka hab dhaqanka. Dib dambe waxaad kaheli doontaa "Buuggyaraha Dheeftaada Caafimaadka Hab Dhaqanka" dhinaca qorshahaaga caafimaadka. Buuggaas wuxuu bixin doonaa macluumaad faah-faahsan oo kusaabsan dheefahaaga laceymis geliyay.

Gobolada Skamania iyo Clark waxaad kuheli doontaa adeegahaaga caafimaadka hab dhaqanka tooska mid kamid ah qorshooyinka daryeelka lamaamuley ee aad heli karto. Qorshaha daryeelka maamulan wuxuu isku duwi doonaa dhammaan adeegahaaga daaweynta aalkoolada, daroogada iyo caafimaadka maskaxda, midkaas oo mararka qaar loogu yeero sida adeegaha jirada isticmaalka maandooriyaha.

Arimaha kusaabsan dheefahaaga caafimaadka hab dhaqanka

Dheefaha caafimaadka hab dhaqanka (adeegaha daaweynta aalkoolada, daroogada iyo caafimaadka maskaxda) aad qaadatid ma ahan kuwo isbedelaya. Laga bilaabo April 1, 2016, sida aad u qaadatid adeegahan way kaduwanaan kartaa haddii aad kunooshahay gobolada Skamania ama Clark. Waxaad qaadan doontaa adeegaha caafimaadka hab dhaqanka ka ahaada mid kamid ah qorshooyinka daryeelka lamaamuley ee hoos lagu qorey.

Fadlan u akhri buuggyarahan si taxadar leh.

Qorshahaaga caafimaadka

Maamulka Daryeelka Caafimaadka waxay heshiisyo la leedahay qorshooyinkaan caafimaadka soo socda ee kajira Gobolada Clark iyo Skamania.

Qorshaha Caafimaadka Bulshada ee Washington (CHPW)
1-800-440-1561

Daryeelka caafimaadka Molina ee Washington (MHW)
1-800-869-7165

Buuggyarahan waxaa kamid ah warqad, ama waxaad heli doontaa mid gooni ah, middaas oo kuu sheegaysa magaca qorshaha caafimaadka daryeelka maamulan ee bixinaya adeegahaaga caafimaadka hab dhaqanka. Haddii aad hadda qaadatid adeegaha caafimaadka hab dhaqanka ama qabtid su'aalo kusaabsan sida lagu helo, fadlan laxiriir qorshahan caafimadka.

Waxaad xaq u leedahay in aad codsatid in aad bedeshid qorshahaaga waqti kasta. Haddii aad jeceshahay in aad dooratid qorshe kale, waxaad isticmaali kartaa foomka-rukunka ee lagu soo lifaaqay warqadaada. Wixii kusaabsan macluumaad dheeri ah oo khuseeya sida loo bedelo qorshooyinka fiiri "Bedelida caafimaadka hab dhaqanka" kuqoran bogga 12.

Kaarka adeegahaaga

Waxaad kuqaadan doontaa labbo kaar tooska boostada, mid ka ahaada dhinaca Washington Apple Health (Kaarka Adeegaha) iyo mid ka ahaada dhinaca qorshaha caafimaadka midkaas oo maamuli doona daryeelka caafimaadka hab dhaqanka. Haddii aad haysatid Caawimaada daryeelka ama ceymis kujirid ceynsanaan kale oo khaas ah, waxaad haysan kartaa sidoo kale kaar gooni ah oo ayaga ka ahaada.

Kudhowaadkii labbo todobaad kadib marka aad isaga qortid Washington Apple Health tooska Healthplanfinder **www.wahealthplanfinder.org** ama Xiriirka Washington **www.washingtonconnection.org**, waxaad qaadan doontaa Kaarka Adeegaha buluuga ah (sidoo kale lagu magacaabo kaarka ProviderOne) sida mid lamid ah midka halkan kusawiran. Hayso kaarkaan. Kaarka Adeegahaaga wuxuu tusinayaa in aad kuqorantahay Apple Health.

Khasab kuguma ahan in aad kashaqaysiiso Kaarka Adeegahaaga cusub. Maamulka Daryeelka Caafimaadka ayaa kashaqaysiin doonta kaarkaaga kahor inta aynaan kugu soo dirin boosto.

ProviderOne

Waxaad ku arki doontaa "ProviderOne" oo kuqorantahay Kaarka Adeegahaaga. ProviderOne waa nidaamka macluumaada midkaas oo isku keen duwa qorshooyinka caafimaadka anaga oona nagu caawiya in aynu kuusoo dirno macluumaad wakhtiyo baddan. Lambarka kuqoran kaarka dushiisa waa lambarkaaga macmiilka ProviderOne, (sagaal-lambar oo kudhamaanaya WA).

Xubbin kasta oo kamid ah qoyskaaga midkaas oo u qalma Apple Health wuxuu helli doonaa Kaarkiisa ama Kaarkeeda Adeegaha. Qofkasta wuxuu haystaa lambar macmiil ProviderOne gooni ah midkaas oo uu asagu ama ayadu haysanayso intiiba uu noolyahay.

Haddii aad hore u haysatey ceymis kujirid Apple Health (ama qabtey Caawimaad caafimaad kahor inta aan loo aqoonsan sida Apple Health) laguuma soo diri doono kaar cusub. Kaarkaaga qadiimka ah weli waa mid shaqaynaya, xitaa haddii uu jiro farqi ama dalool ah ceymis kujirida. Lambarka macmiilka ProviderOne-kaaga wuxuu ahaanayaa sidiisa.

Haddii aadan helin kaarka ama weysid kaarkaaga

Haddii aadan helin Kaarkaaga Adeegaha dhammaadka labbo todobaad kadib marka aad si guul leh u dhammeysid isqoridaada Apple Health ama haddii aad weysid kaarkaaga, fadlan kawac Xarunta Adeega Macmiilka Maamulka Daryeelka Caafimaadka Apple Health lambarkan 1-800-562-3022.

Laxiriir lambarka adeegahaaga xubinka qorshaha caafimaadka hab dhaqanka marka aad:

- Ma u baahantahay in aad hesho adeegaha caafimaadka maskaxda.
- Ma u baahantahay in aad hesho daaweynta daroogada iyo aalkoolada.
- Kuqabtid mushkilad qorshahaaga.
- Doonaysid in aad bedeshid daryeel bixiyahaaga.
- Weysid ama dhumisid kaarka Aqoonsiga qorshahaaga caafimaadka oona doonaysid midkale.
- Qabtid baahi daryeel caafimaad hab dhaqanka ah (ama uu ilmahaaga qabbo)

Kaarkaaga qorshaha caafimaadka

Dhowr todobaad kadib marka aad isku qortid Apple Health, waxaad qaadan doontaa kaarka Aqoonsiga ka ahaada qorshaha caafimaadka daryeelka lamaamuley midkaas oo bixin doona adeegahaaga caafimaadka hab dhaqanka iyo sidoo kale macluumaad baddan oo kusaabsn sida lagu helo adeegahan. Kaarkaaga Aqoonsiga qorshaha wuxuu u ekaan doonaa sida mid lamid ah midkan hoos kamuuqda. Hayso kaarkaan, sidoo kale! Hore u qaado dhammaan Kaarkaaga Adeegaha iyo kaarkaaga Aqoonsiga qorshaha marka aad la kulmeysid bixiyayaashaada caafimaadka hab dhaqanka. Sidoo kale waxaad u baahnaan kartaa Aqoonsi sawir.





Haddii aad u baahantahay adeegaha daryeelka caafimaadka hab dhaqanka kahor inta aan kaararkaaga imaanin

Haddii aad u baahantahay in aad aadid bixiyaha daryeelka caafimaadka hab dhaqanka kahor inta aan imaanin kaararkaaga, hore u qaado warqadaada isqorida. Waxaad aadi kartaa bixiye caafimaad hab dhaqan kasta intiiba bixiyaha uu yahay mid kujira shabakada qorshahaaga (qandaraas lagula galay qorshahaaga caafimaadka). Laxiriir qorshahaaga si aad u oggaatid waxa kusaabsan liiska daryeel bixiyayaasha.

Sidoo kale waxaad wici kartaa qorshahaaga caafimaadka hab dhaqanka haddii aad u baahatid caawimaad, xitaa haddii aadan qaadan Kaarkaaga Adeegaha ama kaarka Aqoonsiga qorshaha caafimaadka.

Maxaa lasamaynaa haddii ay dhacdo xaalad degdeg ah?

Maxay tahay xaalada degdega ah? Middaan waa marka uu qofku u maleeyo in ay khasab kutahay in uu wax u qabto si dhakhso ah si uu uga hortago mushkilado caafimaad halis ah. Wac 911 halmar. Aad isbitaalka kuugu dhow.

- Haddii ay jirto xaalad degdeg ah oo nafta-halis gelinaysa; ama
- Haddii aad dareentid in aad khatar gelin karto nafsadaada ama qofke.

Adeegaha dhibaatooyinka

Dhibaatooyinka waa sida xaalad degdeg ah waxayna kucaawineysaa macamiisha in ay qaataan daryeelka caafimaadka hab dhaqanka loo baahdo.

Waxaad dareemi kartaa:

- Welwel ama kelinimo;
- Murug ama walbahaar;
- Fikrado isdilid ah.

Waxaa laga yaabaa in aad lakulmaysid:

- Mushkilado xiriirka ah;
- Xad gudub daroogo ama aalkoolo ah.

Haddii aad dareentid in aad u baahantahay in lagu geliyo isbitaal si lagaaga daaweeyo caafimaadka hab dhaqanka, ula xiriir bixiyahaaga caafimaadka hab dhaqanka ama khadka adeegaha dhibaatooyinka si degdeg ah.

Adeegaha dhibaatooyinka kajira Gobolada Clark iyo Skamania

Wac Doorashooyinka Caafimaadka Beacon (Beacon)

1-800-626-8137

(ama 360-696-9560 gudaha Gobolka Clark, 509-427-3850 gudaha Gobolka Skamania)

Adeegaha dhibaatooyinka waxaa heli kara dadka waaweyn, qaangaarka, iyo caruurta.

- Khadka dhibaatooyinka shaqeeya 24/7 (labaatan iyo afar saac todobaadka oo dhan);
- Adeegaha dejinta;
- Qaanuunka Daaweynta Iskaadada Ah (ITA).

Maxay yihiin adeegaha laga helo qorshahayga caafimaadka hab dhaqanka?

Waxaad heli kartaa daaweyn kaladuwan oo baddan iyo adeego loogu talogalay caafimaadka maskaxda, darooga iyo xad gudubka aalkoolada. Liiska hoose wuxuu sharxayaa adeegaha laga ceymiyay dhinaca qorshahaaga caafimaadka daryeelka lamaamuley ee qandaraaska lala galay. Haddii aad u baahantahay adeegaha ama qabtid wax su'aalo ah, fadlan wac qorshahaaga caafimaadka waxayna kugu caawin karaan iskuduwida iyo helida daryeelka aad u baahantahay.

Adeegaha daaweynta aalkoolada iyo daroogada ka ahaada dhinaca ururada daryeelka maamulan (MCOs):

Qiimeynta – "wareysi" ka ahaada bixiyaha caafimaadka si loo go'aansado adeegaha aad u baahantahay.

Soo dhexgalid Gaaban iyo Wareejin loo wareejiyo Daaweyn – Waqti kuxadidan, si loo yareeyo isticmaalka mushkilada.

Maamulida Kabixida (Baabi'inta sunta) – Caawimaad laguugu caawiyo yareynta isticmaalkaaga aad isticmaashid aalkoolo ama daroogooyin kale in muddo ah, illaa ay ka noqoto mid ammaan ah in lajoojiyo isticmaalka. (Adeegan kuma jiro daaweyn isbitaalka ah

Daaweynta Bukaan-socodka – fadhiyo latalin koox ama keli ah oo kadhacda gudaha bulshadaada.

Daaweyn Bukaan-socod Degdeg ah – Fadhiyo latalin baddan oo koox ama kelinimo ah.

Daaweynta Bukaan-jiifka Deegaanka – Barnaamij dhammeystiran oo latalinta qofka kelida ah, latalinta kooxda, iyo waxbarasho lagu bixiyo gudaha 24-saacadood-maalintii- xarun la horjoogo.

Adeegaha Daaweynta Bedelka U Ah Qaadashada Daroogada Opiate – Waxay bixineysaa qiimeyn bukaan-socodka ah iyo daaweyn loogu talogalay qofka kutiirsan daroogada opiate. Waxaa kamid ah daawo la oggolaaday iyo latalin.

Maamulid Xaalad – Caawimaad laguugu caawiyo helida adeego caafimaad, bulsho, waxbarasho, iyo adeego kale.

Adeegaha Caafimaadka Maskaxda ka ahaada ururada daryeelka maamulan:

Qiimeyn Gudaha ah – Waxay aqoonsanaysaa baahooyinkaaga iyo ahdaafta waxayna ku caawineysaa bixiyahaaga daryeelka caafimaadka maskaxda in uu kuusoo jeediyo adeego kale iyo daaweyn qorshe.

Adeegaha Daaweynta Qofka – Latalinta iyo/ama hawlo kale oo loogu talogalay in looga dhabeeyo ahdaaftaada kujira qorshahaaga adeega.

Maamulida Daawada – Shaqaale rukhsadaysan ayaa sharxaya daawada oona kaala hadlaya waxyaabaha kusaabsan waxyeelooyinka daawada.

Ilaalinta Daawada – Adeegaha lagu baarayo sida ay u shaqeynayso daawadaada oona laguugu caawinayo in aad u qaadatid si sax ah.

Adeegaha Daaweynta Kooxda ah – Latalin lala yeesho dad kale oo qabba caqabado lamid ah.

Taageero Saaxiib – Caawimaad laguugu caawiyo raadinta nidaam caafimaad maskaxda ah iyo gaarida ahdaaftaada ficnaanshaha ah, kuwaas oo laga bixiyo dhinaca qof tababaran midkaas oo kujira kaficnaanshaha laga ficnaado jirada maskaxda ah.

Daaweynta iyo Soo dhexgalka Gaaban – Latalin muddo-gaaban middaas oo diirada lagu saaro mushkilad xadidan ama gaar ah.

Daaweyn Qoys – Latalin kusaabsan-qoyska middaas oo lagu caawinayo dhisida xiriiro xoogan iyo xalinta mushkiladaha.

Daaweynta Aadka Degdega U Ah – Adeegaha laga bixiyo dhinaca bixiyayaasha caafimaadka maskaxda si laguugu caawiyo in laga dhabeeyo ahdaaftaada kujira qorshahaaga adeega.

Daaweynta Waxbarashada Nafsaaniga ah – Waxbarasho kusaabsan jirooyinka maskaxda, doorashooyinka daaweynta caafimaadka, daawooyinka iyo ficnaanshaha, ay kujirto taageerooyinka iyo/ama adeegaha taageerada ah.

Taageerada Maalinta ah – Barnaamij degdeg ah ama xoogan oo lagu baranayo ama lagu caawiyo xirfadaha noolaanshaha madax banaan.

Qiimeyn iyo Daaweyn/Isbitaal dhigid Bulshada ah – Daryeelka dhibaatada bukaan-jiifka lagama maarmaan u ah caafimaad ahaan. Adiga **uma** baahnid qiimeyn gudaha bukaan-socodka ah kahor adeegan.

Adeegaha Dejinta – Lagu bixiyo gudaha gurigaaga ama meel guriga-oo kale ah si laguugu caawiyo in aadan joogin isbitaalka. Adiga **uma** baahnid qiimeyn gudaha ah kahor adeegan.

Maamulida Xaalada Baxnaaniska – Iskuduwid u dhaxeeya adeegahaaga caafimaadka maskaxda bukaan-socodka iyo bukaan-jiifka. Middaan waxay noqon kartaa qayb kamid ah qiimeyntaada gudaha ah.

Adeegaha Caafimaadka Maskaxda Lagu Bixiyo gudaha Meelaha Deegaanka – Adeegaha laguugu siiyo meesha aad kunooshahay haddii aad kunooshahay meel koox ah.

Qiimeynta Dadweynaha Gaarka ah – Caawimaada qorshaha daaweynta ka ahaata takhasusle la shaqeeya caruurta, dadka waaweyn iyo dadka ka ahaaday asal dhaqan-baddan.

Qiimeynta Nafsaaniga ah – Baaritaan dad kucaawinaya garashada cudurka, qiimeynta, iyo qorshaha daaweynta.



Maxay yihiin arimaha kusaabsan dheefahayga daryeelka caafimaadka jirka?

Waxaad sii wadan kartaa qaadashada dheefahaaga caafimaadka jirka sida aad maanta u qaadatid. Qaababka aad u qaadatid daryeelka caafimaadka jirka waxaa kamid ah:

- Caawimaad caafimaad, ceymis caafimaad khaas ah, ama Xarumaha Caafimaadka Hindiya.
- Daryeelka maamulan ee Apple Health ee qorshaha caafimaadka si gaar ah loogu talogalay caruurta kujira daryeelka korinta ama xanaanada.
- Barnaamijka Maamulida Xaalada Daryeelka Aasaasiga ah (PCCM). Macamiisha Barnaamijka Maamulida Xaalada Daryeelka Aasaasiga ah waxay kaqaataan daryeelka caafimaadka jirka tooska Xarumaha Caafimaadka Hindiya.

Si wadajir ah, qorshooyinkaaga caafimaadka jirka iyo caafimaadka hab dhaqanka waxay bixiyaan adeego qofka-buuxa, ceymis buuxa (adeegaha daaweynta aalkoolada, daroogada, caafimaadka maskaxda, iyo caafimaadka jirka).

Haddii aad u baahantahay daryeel

Caafimaadka maskaxda	Wac qorshahaaga caafimaadka hab dhaqanka ama bixiyaha caafimaadka hab dhaqanka.
Daaweynta daroogada iyo khamrada	Wac qorshahaaga caafimaadka hab dhaqanka.
Kadib saacadaha-dareeylka	Wac khadka latalinta kalkaaliyahaaga qorshaha caafimaadka hab dhaqanka, 24 saac maalintii, todobo maalin todobaadkii.
Dhibaatooyinka	Wac Doorashooyinka Caafimaadka Beacon (labmarada teleefoonka waxay kuqoranyihiin bogga 9).
Daaweynta daroogada iyo khamrada	Wac 911 ama aad meesha kuugu dhow meeshaas oo ay kugu caawin karaan daryeel bixiyaal xaaladaha degdega ah. Sida ugu dhakhsiyaha baddan, adiga ama qofkale oo aad garanaysid ayay khasabtahay in uu u waco qorshahaaga caafimaadka hab dhaqanka si uu ugu sheego xaaladaada degdega ah. Middaan waxaa lahelayaa 24 saac maalintii, todoboda maalin todobaadkii.
Daryeelka kafog guriga	Haddii aan ahayn xaalad degdeg ah, wac bixiyahaaga caafimaadka hab dhaqanka ama khadka latalinta kalkaaliyahaaga, kuyaala dusha kaarkaaga Aqoonsiga qorshaha.

Adeego kale

Waxaa dhici karta in aad u baahatid turjumaan

Haddii aadan sifiican ugu hadlin luuqada Ingiriiska, turjumaanayaal xirfadlayaal ah ayaa lagu helayaa luuqado baddan, ay kujirto luuqada dhagoolayaasha ee tilmaan bixinta ah, ayada oo aan wax lacag ah kuugu fadhin. Marka aad sameysanaysid ballan, u sheeg shaqaalaha soo dhoweynta haddii aad u baahantahay turjumaan. Turjumaanka wuxuu aadi karaa xafiiska daryeel bixiyaha ama wuxuu kujiri karaa teleefoonka inta lagu guda jiro ballantaada.

Way wanaagsantahay in la isticmaalo mid kamid ah turjumaanadaan xirfadlayaalka ah halkii laga keeni lahaa xubin qoys ama saaxiib si uu adiga kuugu turjumo. Turjumaanada waxaa lagu tababarey in ay fahmaan weeraha daryeelka caafimaadka. Waxay adiga iyo daryeel bixiyahaaga kucaawin doonaan in aad sifiican isku fahantaan.

Haddii aad qabtid naafo ama curyaanimo

Haddii aad qabtid curyaanimo maqalka ama hadalka ah ama mowduuc dhaqaaq, waxaa khasab kugu ah in aad u sheegtid qofka istiqbaalka jooga marka aad samaysanaysid ballaantaada. Shaqaalaha soo dhoweynta jooga ayaa kugu caawin doona waxkasta oo nidaamin lagama maarmaan ah.

Waxaad heli kartaa caawimaad gaadiidka ah

Haddii aadan garanayn qaab aad kutagtid ballantaada, waxaad xaq u leedahay in laguugu caawiyo gaadiid raacid. Ballantu waa in ay ahaato mid loogu talogalay adeegaha laga oggolaaday dhinaca qorshahaaga caafimaadka hab dhaqanka. Gaadiid bixinta labixiyey waxay noqon doontaa midda ugu habboon uguna lacagta jaban, laakiin ma ahan mid adiga wax lacag ah kuugu fadhida. Noocyada ugu baddan ee gaadiidka lahelo waxaa kamid ah: baska dadweynaha, foojarada gaaska, magdhowga masaafada iskaa wax u qabsiga iyo macmiilka, daraawaliin iskaada ah, taksi, gaariga kursiga curyaamiinta ama gaari laheli karo, iyo baska ganacsiga iyo hawada. Liis kusaabsan dalaaliinta ayaa laga heli karaa boggaan internetka ah: **www.hca.wa.gov/medicaid/transportation/pages/newrequest.aspx** kadibna kudhufo dusha "Regional Broker." "Dalaalka Gobolka."

Bedelida qorshooyinka caafimaadka hab dhaqanka

Waxaad xaq u leedahay in aad codsatid bedelida qorshahaaga caafimaadka hab dhaqanka waqti kasta. Ayada oo ay kutiirsantahay marka lasamaynayo codsigaaga, qorshahaaga cusub wuxuu inta baddan bilaabmayaa kowda bisha soo socota. Waxaad kubedelan kartaa qorshahaaga adiga oo:

- Kasoo degsada foomka isqorida boggaan internetka **www.hca.wa.gov/medicaid/forms/Documents/13_862.pdf**. Soo buuxi kadibna faakis ugu soo dir lambarka faakiska kuqoran foomka.

  AMA

- Kawac Adeega Macmiilka Apple Health lambarkaan 1-800-562-3022 (TTY/TDD 711 am 1-800-848-5429).

Xuquuqahaaga iyo masuuliyadahaaga

Qaanuun ahaan, waxaad leedahay xuquuqo khuseeya adeegaha daryeelka caafimaadka aad heshid, sidoo kale adiga waxaad leedahay masuuliyado gaar ah si ay kuugu caawiyaan in aad ahaatid oona horumarisid caafimaadkaaga ugana fogaatid qiimooyinka aan muhiimka ahayn.

Adiga waxaad xaq u leedahay in:

- Caawimaad kusaabsan qaadashada go'aanada khuseeya daryeelkaaga caafimaadka hab dhaqanka, ay kujirto diidista daaweynta.
- Laguula socod siiyo waxyaabaha kusaabsan dhammaan doorashooyinka daaweynta lahelo, ayada oo aan la eegayn qiimaha.
- Heshid fikrad labbaad oo ka ahaata bixiye kale oo kujira qorshahaaga caafimaadka.
- Qaado adeego adiga oo aan sugin muddo dheer.
- Laguula dhaqmo si xushmad iyo sharaf leh. Midab takoor lama ogola. Majiro qof loola dhaqmayo si gooni ah ama si aan daacad ahayn jinsigooda, midabkooda, asalkooda dhallashada, noocooda, door bidid galmo, da'a, diin, caqiido, ama curyaanimo darteeda.
- Uga hadal si xur ah waxyaabaha kusaabsan daryeelkaaga caafimaadka iyo welwelada ayada oo aan jirin wax natiijooyin xun.
- In laguu ilaaliyo ama laguu dhowro waxyaabahaaga gaarka ah iyo in macluumaada kusaabsan daryeelkaaga sir lagu dhowro.
- Weydiisid oona heshid nuqulo khuseeya diiwaanadaada caafimaadka.
- Weydiisid oona lahaatid sixitaano lagu sameeyo diiwanadaada caafimaadka marka loo baahdo.
- Weydiisid oona heshid macluumaad kusaabsan:
  - Daryeelkaaga caafimaadka iyo adeegaha ceymiska kujira.
  - Daryeel bixiyahaaga iyo sida loo sameeyo wareejinta lagu wareejiyo takhasusle iyo daryeel bixiyayaal kale.
  - Sidda qorshaha caafimaadka u bixiso daryeel bixiyayaashaada loogu talogalay daryeelkaaga caafimaadka.
  - Dhammaan doorashooyinka loogu talogalay daryeelka iyo sababta aad u helaysid noocyo gaar oo daryeel ah.
  - Sida lagu helo caawimaad ayada oo lafayl gareeyo cabasho ama dacwo kusaabsan daryeelkaaga.
  - Qaab dhismeedka qorshaha caafimaadkaaga urureed waxaa kamid ah siyaasado iyo qaab hawleed, heerar waxqabad, iyo sida loogu taliyo isbedelada.
- Kuqaado Xuquuqahaaga Xubanimo iyo Masuuliyadaha adiga oo usoo qora ugu yaraan si sannadle ah. Xuquuqahaaga waxaa kamid ah adeegaha daaweynta aalkoolada, daroogada iyo caafimaadka maskaxda.
- Qaado liis kusaabsan lambarada teleefoonka dhibaatooyinka.
- Heshid caawimaada buuxinta foomamka maskaxda iyo toosinta daawada caafimaadka sareysa.

Waxaad leedahay masuuliyada in:

- Caawimaad kusaabsan qaadashada go'aanada khuseeya adeegaha daaweynta aalkoolada, daroogada iyo caafimaadka maskaxda, ay kujrto diidista daaweynta.
- Ilaalisid balamaha oona ahaatid wakhtiga laguugu talogalay. Wacdid xafiiska daryeel bixiyaashaada haddii aad soo daahaysid ama haddii ay khasab kugu tahay in aad burisid ballanta.
- Siisid daryeel bixiyaashaada macluumaada ay u baahanyihiin si loogu bixiyo adeegaha adiga lagu siinayo.
- U muujisid daryeel bixiyaashaada isla ixtiraamka adiga ayaga karabtid.
- Keentid Kaarka Adeegahaaga iyo kaarka Aqoonsiga qorshaha caafimaadka dhammaan balamahaaga.
- Baratid waxa kusaabsan qorshaha caafimaadkaaga iyo waxa ay yihiin adeegaha lageliyay ceymiska.
- Isticmaashid adeegaha daryeelka caafimaadka marka aad u baahatid.
- Ogaatid mushkiladaha caafimaadkaaga kana qayb qaadatid samaynta ujeeddooyinka daaweynta la isku-raacay intiiba ay suurtogaltahay.
- Siisid daryeel bixiyaashaada iyo qorshaha caafimaadka macluumaad buuxda oo kusaabsan caafimaadkaaga si aad u heshid daryeelka aad u baahantahay.
- Raacdid tilmaamaha daryeel bixiyahaaga ee loogu talogalay daryeelka adigu aad ogolaatay.
- U isticmaashid adeegaha daryeelka caafimaadka si sax ah.
- Noogu soo wargeli isla markiiba haddii ay isbedesho tirada dadka kunool qoyskaaga (sida uur in uu yimaado, in ay ilmo dhashaan, in ilmo la korsado) ama in ay isbedesho duruuftaada ama xaaladaada (sida in aan yeelato cinwaan cusub, isbedel kudhaca dakhliga, ama aad noqotid qof u qalma Daryeelka caafimaadka ama ceymis kale).
- Cusboonaysiisid ceymis kujiridaada si sanadle ah adiga oo isticmaala bogga intarnatka Healthplanfinder halkaan **www.wahealthplanfinder.org**. Sidoo kale adiga waxaad isticmaali kartaa boggaan internetka si aad usoo sheegtid isbedelada kudhaca koontadaada xisaabta. Haddii aad isticmaashid Xafiiska Adeega Bulshada gudaha (CSO), xusuusnoow in aad ugu buuxisid codsashooyinka u qalmida qaab boosto ama sitoos ah internetka bogga internetka Xiriirka Washington **www.washingtonconnection.org**.

Haddii aadan kufaraxsanayn qorshahaaga caafimaadka

Waxaad xaq u leedahay in aad soo dirto fayl dacwo (cabasho) haddii aadan kufaraxsanayn qaabka laguula dhaqmey. Sidoo kale adiga waxaad xaq u leedahay in aad rafcaan kasameyso go'aanka ay qaadanayso qorshaha caafimaadka haddii uu diidayo adeega ceymis kujira. Qorshahaaga caafimaadka waa in uu kugu caawiyo sameynta faylka cabashada ama rafcaanka.

- Qorshahaaga caafimaadka waa in uu kuugu sheego taleefoon ama warqad in uu helay cabashadaada gudaha labbo maalin shaqo.
- Qorshahaaga caafimaadka waa in uu kuugu sheego qoraal in uu helay rafcaankaaga gudaha 72 saacadood.

Welweladaada waa in loo sheego sida ugu dhakhsiyaha baddan ee ugu suurtogalka ah, ayada oo aan qaadan wax kabaddan 45 maalmood.

Matahay mid degdeg ah? Haddii aad rafcaan kusamaynaysid go'aan oona qabtid xaalad caafimaad hab dhaqan degdeg ah, adiga ama daryeel bixiyahaaga ayaa codsan kara muraajaco degdeg ah (dhakhso ah) ama dhagaysi. Haddii ay xaaladaada caafimaadka hab dhaqanka u baahantahay, go'aan ayaa lagu qaadan doonaa gudaha 72 saacado shaqo ah oo kusaabsan daryeelkaaga. Ugu noqo "Buuggyarahaaga Dheefta Caafimaadka Hab dhaqanka" wixii kusaabsan macluumaad faah-faahsan oo tallaabooyinkan khuseeya.

Oggeysiis ku saabsan arimaha gaarka ah

Kaarka Adeegahaaga ma ahan mid ka kooban wax macluumaad shakhsi ah aan ka ahayn magacaaga, lambarkaaga ProviderOne, iyo taariikhda mowduuca. Middaan waxay ilaalinaysaa arimahaada gaarka ah ama sirtaada haddii kaarka uu lumo ama laxado. Midna Maamulka Daryeelka Caafimaadka (HCA), ama qorshahaaga caafimaadka kulama soo xiriiri doonaan si toos ah si ay kuu weydiistaan macluumaadkaaga shakhsiyeed si loo helo ama loo bedelo Kaarka Adeegaha. Weligaaga hasiinin macluumaadaada shakhsiga ah, sida lambarka Dammaanada Bulshada, qof kusoo waca ama boosto ama iimayl kuusoo dira kuna weydiista macluumaadaada shakhsiga ah.

Sharci ahaan, dhammaan qorshooyinka caafimaadka waxaa loogu baahanyahay in lagu ilaaliyo macluumaadkaaga caafimaadka. Qorshooyinka caafimaadka iyo Maamulka Daryeelka Caafimaadka waxay isticmaalaan oona dadka lawadaagaan macluumaadka caafimaadka la ilaaliyay ee adiga kugu saabsan si loo bixiyo dheefahaaga caafimaadka hab dhaqanka; si loo fulliyo daaweynta, lacag bixinta, iyo hawlgalada daryeelka caafimaadka; iyo sababo kale oo lagu oggolaaday looguna baahanyahay qaanuunka. Qorshooyinka caafimaadka iyo Maamulka Daryeelka Caafimaadka waxaa waajib kasaaran in ay ku ilaaliyaan macluumaadaada caafimaadka meel sir ah.

Si aad u akhrisid siyaasada khaas ahaanta Maamulka Daryeelka Caafimaadka, gal bogga internetka **www.hca.wa.gov** kadibna kudhufo dusha "Privacy""Khaas ahaanta" ee kuyaala hoosta bogga. Haddii aad doonaysid in aad akhrisid waxa kusaabsan siyaasada sirta ah ee qorshahaaga caafimaadka, wac xubinkaaga adeegaha qorshaha caafimaadka ama booqo bogga intarnatka qorshaha.

Halka laga helo jawaabaha su'aalahaaga

Haddii aad qabtid wax su'aalooyin ah oo kusaabsan ...	Kalaxiriir ...
• Bedelaada qorshooyinka caafimaadka • Uqalmitaanka loogu talogalay adeegaha caafimaadka hab dhaqanka • Kaararka adeegaha • Siddee lagu helaa adeegaha haddii aad kaguurtid Gobolka Clark ama Skamania	Adeega Macmiilka Apple Health lambarkaan 1-800-562-3022 ama u dir su'aalahaaga dhinaca boggaan **https://fortress.wa.gov/hca/p1contactus/**
• Doorashada bixiye caafimaad hab dhaqanka ah • Adeegaha ceymiska kujira • Wareejitanada loogu talogalay adeegaha caafimaadka hab dhaqanka	Qorshahaaga caafimaadka hab dhaqanka. Lambarka teleefoonka qorshahaaga caafimaadka hab dhaqanka waxaa lagu qorey dusha bogga 7 aad ee buuggyarahaan.
Isbedelada lagu sameeyo koontadaada xisaabta, sida: dakhliga, xaalada guurka, uurka, dhallashooyinka, ama korsashada; ama in lacusboonaysiiyo cinwaankaaga	• Sitoos ah internetka **www.wahealthplanfinder.org** ama • Wac 1-855-923-4633 isticmaalayaasha (TTY/TDD waxay wacaan 1-855-627-9604) ama • Tag Xafiiska Adeegaha Bulshada Waaxda Adeegaha Bulshada iyo Caafimaadka (CSO) ama • Gal bogga internetka Xiriirka Washington **www.washingtonconnection.org**

Boggag internet oo muhiim ah

Bogga internetka	URL
Bogga internetka Washington Apple Health (Caawimaada caafimaadka)	**www.hca.wa.gov/medicaid/Pages/index.aspx**
Codsiga loogu talogalay Gaadiidka Caafimaadka Aan-Degdega ah	**www.hca.wa.gov/medicaid/transportation/pages/newrequest.aspx**
Foomka Isqorida (Caawimaada caafimaadka) Apple Health (Medicaid)	**www.hca.wa.gov/medicaid/forms/documents/13_862.pdf**
Washington Healthplanfinder	**www.wahealthplanfinder.org**
Xiriirka Washington	**www.washingtonconnection.org**
Khadka Caawimaada Ficnaanshaha	**www.waRecoveryHelpLine.org**. Haddii aad u baahantahay daaweyn, wac 24-saacadood, lambarka khadka sirta iyo lacag la'aanta ah 1-866-789-1511 (TTY 1-206-461-3219).

Si aad ugu heshid dukumeentigan qaab kale (sida luuqada Braille ee dadka indhoolaha ah ama qaab maqal ah), kawac Adeega Macmiilka Maamulka Daryeelka Caafimaad ee Apple Health lambarkan 1-800-562-3022. (Khadka TTY/TDD waa 711 ama 1-800-848-5429 ee loogu talogalay dadka qabba dhibaatooyin maqal ama araga ah)

Wac lambarkan 1-800-562-3022, haddii dukumeentigan uu yahay mid kuqoran luuqad aadan akhrin karin. Dukumeentigan waxaa lagu helayaa luuqad kale oo aan wax lacag ah kuugu fadhin adiga.

Washington State
Health Care Authority

P.O. Box 42719
Olympia, WA 98504-2719

HCA 19-049 SM (2/16) Somali